

Talaalka caruurta ee Haemophilus nooca B (Hib)

Talaalku (ama iraabka ama durniinka ilmahu) waxa weeye sida ugu wanaagsan ee loogaga hor tegi karo cudurada khatarta ah. Ururada Canadian Paediatric Society iyo National Advisory Committee on Immunization waxa ay si adag isugu raaceen talaal joogto ah.

Talaalka Hib ee caruurta wuxuu caruurta ka difaaca cudurada khatarta ah sida qoor-gooyaha (meningitis) laga qaado Haemophilus influenzae nooca b ama jeermiska Hib. Waxa loogu tala galay caruurta yar-yar ee da'doodu ka yar tahay shan sanno.

Waa maxay cudurka Haemophilus influenzae nooca B (Hib) ?

In kasta oo "influenzae" uu yahay qayb ka mid ah magaca cudurkan, jeermiska Hib ma keeno influenza ama safka. Xanuunka Hib ayaa in badan ka khatarsan. Ka hor intii aan la isticmaali jirin talaalka Hib, jeermiska Hib wuxuu ahaan jiray midka sida caadiga ah caruurta xanuunka u keena. Hib wuxuu ahaan jirey waxa caruurta da'doodu u dhaxayso laba bilood ilaa shan sanno u keena xanuunka qoor-gooyaha. Qoor-gooyuhu waa cudur ku dhaca biyaha ku jira iyo maqaarka daboolaf-dhabarta. Qoor-gooyuhu wuxuu keeni karaa dhaawac maskaxeed, dhibaatooyin ayuu u keeni karaa wax barashada iyo koritaanka, dhego la'aan iyo indho beel ayaa laga qaadi karaa. Mid ka mid ah 20-kii caruur ah ee uu ku dhaco Qoor-gooyuhu ayaa dhiman kara dhibaatooyin la'xaad beel ihina (dhaawaca dareemayaasha iyo dhego-beel) waxay ku dhici karaan 15%.

Jeermiska Hib wuxuu sidoo kale xanuun khatar ah u keeni karaa dhuunta meel u dhow sanduuqa hadalka. Xanuunka waxa la yidhaahdaa epiglottitis. Tani waxay ilmaha ku dhibtaa neefsashada.

Jeermiska Hib wuxuu kale oo uu cudur ku ridaa sam-babada (pneumonia) lafaha iyo xubnaha. Caruurta da'doodu ka yar tahay shan sanno ayaa halis aad ugu ah oo qaadi kara cudurka Hib. Caruurta aada xarumaha xanaanada ayaa u badan inay cudurkan qaadaan. Jeermiska Hib waxa laga qaadaa ama uu ku fidaa qufaca ama hindhisada.

Ilaa xad intee le-eg ayuu talaalka Hib difaaci karaa ilmahayga?

Talaalku wuxuu difaaca ilaa boqolkiiba 95 caruurta haddii inta irbadood ee talaalka Hib loogu tala galay la siiyo. Talaalku kama hor tegayo jeermisyada kale ee keena qoor-gooyaha.

Da'dee ayaa ilmahayga lagu siin karaa talaalka Hib?

Ilmahaagu waa inuu talaalka ugu horeeya qaataa marka uu yahay laba bilood. Saddex talaal oo kale ayuu u baahanyahy--marka uu yahay afar, lix iyo 18 bilood. Talaalkan badi waxa la siiyaa caruurta dhalata iyo kuwa yar-yar isaga oo ku jira talaalka kale ee cPDT polio. Way yar tahay inta kelidii caruurta la siiyaa.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu qaadan talaalada mid ka mid ah?

Ilmahaagu waa inuu qaataa talaalka ku xiga kii aanu qaadan sida ugu dhakhsaha badan. Haddii aanu ilmahaagu qaadan talaalkii ugu horeeyey ee labada bilood, dhakhtarkaaga ayaa kuu qorshayn jadowal "la qab-sasho ah" oo khaas ah.

Caruurta da'doodu u dhaxayso 15 bilood ilaa shan sanno ee aan hore loo talaalini waxay u baahan yihiin talaal keliya oo ah Hib ka dibna talaalo dheeraad ah oo ah cPDT Polio. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi talaalada lagaaga baahan yahay.

Ma yahay talaalka Hib mid aan wax yeelo lahayn?

Haa. Caruurta qaar-kood ayaa yeesha damqasho yar, barar iyo meesha talaalka laga siiyey oo casaataa dhawr maal-mood. Qayb yar oo caruurta ka mid ahina waxay yeeshaan xumad yar, xasaasad ama caaro. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'iidooyinka talaalkasta.**

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

La hadal dhakhtarkaaga haddii ilmahaagu saddex maalmood gudahood talaalka kadib:

- yeesho xumad badan (ka badan 40 C ama 104 F)
- suuxo
- ilmaha oo midab doorsooma oo u ekaada siddii wax daan-daansan
- caarooda
- afka ama wejiga uu bararo
- neeftu ay qabato
- ama dhibaatooyin kale oo khatar ah aad ku aragto.

Yaa laga daayaa talaalka Hib ?

Dhakhtarka ayaa laga yaabaa inuu talaalka ka dhaafo ama u bedelo ilmahaaga haddii uu leeyahay:

- xumad badan ama qabo xanuun ka xun hargab
- xasaasiyad xun ka qaado talaalkan (anaphylaxis)
- xasaasiyad ka qaado qayb ka mid ah dawooyinka talaalka ku jira.

Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka Hib?

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku kaadhka jaalaha ah ku diiwaan geliyo talaalka. Waxaad u baahan doontaa diiwaan gelintan inaad siiso rugtaada caafimaadka marka ilmuhu dugsiga bilaabay. Meel adag dhig!